

# CAAFIMAADKA

Ku caawimeysa dhibbanayaasha colaada hubeysan iyo masiibooyinka iyadoo u hagaajineysa helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka ee lagama maarmaanka ah.

## JIIL CUSUB OO NOLOL KU BADBAADINAAYA SOOMAALIYA



Waaxda qalliinka ee Isbitaalka Keysaney, Muqdisho.

Maalintii ugu horraysay ee Kalkaaliye Yaxya iska xaadiriyeey waaxda qalliinka Isbitaalka Keysaney oo ku yaalo Muqdisho ayaa waxaa la keenay bukaan qabaa dhawacyo xabad oo halis ah. Yaxye ayaa caawimada geystay halka dhakhaatiirta sare qalliinka ka badbaadiyeey khatar, fursadan caawinta ahna loogu magac daray “riyo rumowday.”

“Tani waxay gebi ahaanba i dareensiisay farxad,” Yaxye ayaaa sidaa yiri maalintiisi ugu horraysay ee qalliin sameeyo bishii Abriil.

Asago ku koray caasimadda Soomaaliya oo tabankii sano la soo dhaafay la kulantay dagaal ba’an iyo weeraro bambaano, Yaxye ayaa goor hore noloshiisa yiri in uu xiiso u hayo caawinta dhibanayaasha rabshadaha. “Arday ahaan ma sugi karo in aan sii dhammeysto waxbarashadeyda,” 21 jirka ayaa sidaa yiri.

Isbitaalka Keysaney door muhim ah ayuu ka cayaaray in gagaar caafimaad oo deg deg ah u fidiyo dadka waxyeelada ka soo gaartay dagaalada. Yaxye wuxuu u riyaaqi lahaa in isbitaalka fursad siiyo kalkaaliyaasha caafimaad oo niyadda u haya in ay waxbartaan hadana ku lug yeeshaan..




Dr. Taajir oo baaraya raajo bukaan Yaxyena uu eegaayo.

tababarkan sharafta leh ujeedkiisuna yahay hagaajinta nolol bulshooyinka. Waxaan rumeysanahay in anaga keeni karno isbedelka/ Yaxye ayaa yiri oo horraanta sannadka soo socda dhammeysanaaya tababarka.

Yaxye wuxuu qaatay tababar kalkaaliye caafimaad ee dhanka qalliinka, dhayida iyo tovida. Asago raacaya talada dhakhtarka sare ee qalliinka isbitaalka, Dr. Axmed Maxamed-sida weyn loo yaqaano Dr. Taajir ayaa Yaxye hadda awood u leeyahay in dhakhaatiirta qalliinka ku caawiyi la wax ka qabashada xaaladaha khaaska ah.

Keysaney waa mid ka mid ah isbitaalada Soomaaliya ugu sareeya. Intii u dhaxeysay Janaayo iyo Maay 2015, in ka badan 700 bukaan ayaa la dhigay isbitaalka oo 217 ay ahaayeen xaalado la xiriira dhaawac hub. ICRC waxay taageertaa 4 isbitaal oo ku yaalaan Koofurta iyo Bartamaha Soomaaliya uuna ka mid yahay Isbitaalka Keysaney oo si buuxda loo qalabeeyey si u daaweeyo xaaladaha dhaawaca hubka.



Si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan ICRC-da Soomaaliya booqo [www.blogs.icrc.org/somalia/so](http://www.blogs.icrc.org/somalia/so)

Email: [sok\\_somaliblog\\_services@icrc.org](mailto:sok_somaliblog_services@icrc.org)